



Macluumaadka korantada, gaaska iyo biyaha oo loogu talagalay macaamiisha ku nool NSW

Miyay ku haysaa dhibaato kaa haysata bixiyaha tamartaada iyo biyahaaga?

Waan ku caawin karnaa.

Waxa la sameeyo haddii aad dhibaato qabto

Marka hore la xiriir shirkadda korantadaada, gaaskaaga ama biyahaaga una sharax dhibaataada. Haddii aad u baahan tahay turjumaan u sheeg shirkadda. Ama weydiiso saaxiibka ama xubin qoyska ah si ay kuula hadlaan shirkadda adiga.

Haddii aad wacdo shirkadda, ku hayso diiwaanka magaca qofka aad la hadashay, iyo sidoo kale taariikhda iyo waqtiga. Hayso wixii waraaqo ama dokumanti ah oo aad ka hesho shirkadda.

Haddii shaqaalaha xarunta wicitaanku aysan ku caawin karin, weydii inaad la hadasho maareeyaha.

Haddii aan dhibaataadii la xalin, taleefan u dir Energy & Water Ombudsman NSW (EWON) taleefanka lacag la'aanta ah 1800 246 545.

Wax ku saabsan EWON

EWON waxay caawisaa dadka ku nool New South Wales kuwaas oo ay ka hayaan dhibaatooyin xagga bixiyaha korantadooda iyo gaaskooda. Waxaan kaloo kaa caawin karnaa cabashooyinka biyaha qaarkood.

Adeegga EWON waa lacag la'aan, caddaallad iyo mid madax-bannaan.

Waxaan ka caawinnaa dhibaatooyinka sida:

- Biilasha sarreeya
- Dhibaatooyinka daymaha iyo lacag-bixinta
- Ka-jaridda korantada, gaaska ama biyaha
- Furidda ama Xiridda akoonka
- Heshiisyada korantada ama gaaska
- Suuq-doonka tamarta
- Adeegga macaamiisha faqriga ah
- Tayaynta agabka
- Codsiyada magdhowyada

EWON waxay kuu diyaarin kartaa cid ka socota takhsuslaha bixiyaha ee kooxda xallinta khilaafka si ay kaala soo xiriiraan wax ku saabsan dhibaataada ama anaga ayaa baari karna cabashadaada

Sida loola xiriiro EWON



Wicitaan lacag la'aan ah 1800 246 545
Isniinta ilaa Jumcaha 9am–5pm

Haddii aad ka soo wacayso taleefanka moobaylka, noo sheeg waana ku soo wacaynaa.



www.ewon.com.au



Email—ka omb@ewon.com.au



TTY 133 677



Boosto lacag la'aan ah Reply Paid 86550
Sydney South NSW 1234



www.facebook.com/ewonsw



www.twitter.com/ewonsw

Adeegga turjumaanka

Haddii aad u baahan tahay turjumaan kala xiriir Adeegga Translation and Interpreting Service (TIS) taleefanka 131 450. Weydii TIS inay ka wacaan EWON taleefanka 1800 246 545.



Maaraynta akoonka tamartaada iyo biyahaaga

Furidda iyo xiridda akoonada

Waxaa muhiim ah inaad furato akoonka korantada markaad ku soo guurto guri cusub ama helidda korantadaada waa lagaa jarayaa. Haddii gurigaagu leeyahay adeegga gaas aad doonayso inaad isticmaasho, waxaad kaloo u baahan doontaa inaad furato akoonka gaaska. Waad kala dooran kartaa oo isku baddali kartaa shirkadda korontadaada iyo gaaskaaga. Ka eeg www.energymadeeasy.gov.au si aad u hesho heshiiska ugu wanaagsan gurigaaga. Website-kaas wuxuu ku tusyaa soo-bandhigyada (offer) ka jira degaankaaga, isbarbardhigga qarashyadooda iyo xiriiradooda si loola xiriiro macluumaadka shirkadaha tamarta ee bixiya. Waxaad kaloo ka wici kartaa adeegga Energy Made Easy taleefanka 1300 585 165.

Waxaad kaloo xiri kartaa akoon kasta markaad guurto si aad bixiso oo keliya korontada, gaaska ama biyaha aad isticmaashay. Sidaas waxaad ku samayn kartaa taleefan.

Akoonka biyaha

Haddii aad ku soo guurayso guriga Housing NSW, caravan park ama guri kiraysiga gaarka ah oo leh mitirkeeda biyaha, waxaad bixinaysaa biyihii aad isticmaashay. Weydii milkiilahaaga haddii ay tahay inaad iska bixiso biyaha.

Bixinta biilashaada

Macaamiisha qaarkood waxay helaan biilasha tamarta iyo kuwa biyaha saddexdii biloodba mar qaarkoodna waxay helaan biil bille ah. Haddii biilkaagu kuu imanwaayo, la xiriir shirkadda.

Badiba shirkaduhu waxay kuu ogolaadaan inaad biilashaada ku bixiso xafiiska boostada, ama taleefanka adoo isticmaalaya credit card, online ama Centrepay. Haddii aad qaadato lacagaha Centrelink waxaad dooran kartaa inaad qadar lacag joogto ah inaad si toos ugu bixiso lacag-bixinadaada biilasha tamarta ama biyaha adigoo adeegsanaya Centrepay. Wixii macluumaad dheeraad ah ka wac Centrelink taleefanka ah 131 202.

Waa masuuliyaddaada inaad waqtiga la rabo ku bixiso biilashaada. Haddii aadan bixin Karin biilka, kala hadal shirkadaada sida ugu dhaqsaha badan waana inaad caawimaad u heshaa sida ugu dhaqsaha badan.

Biilasha la qiyaasay

Badanaa waxaa lagugu soo qoraa biil ahaan wixii tamar aad isticmaashay. Sidaasna waxaa cabira ninka meter reader-ka kaas oo yimaada gurigaaga si uu u jeegareeyo mitirka. Waa inay aqriyaan mitirkaaga ugu yaraan hal mar 12kii biloodba. Haddii uusan jirin meter reading muddada biilka, biilka waa layska qiyaasaa, ayadoo ku salaysan isticmaalkaagii tamarta ee hore ama isku celceliska isticmaalka macaamiil kula mid ah. Biilka ayaa lagu sheegayaa inuu yahay lacago dhab ah ama isticmaalka la qiyaasay.

Haddii biilkaaga la qiyaaso, waxaa lagu saari karaa wax aad uga yar isticmaalkaagii markaasna biilka dhabta ah ee kan ku xiga wuu ka saraynayaa wixii aad filaysey. Haddii lagu saaray wax aad u sarreeya, dib-u-habayn ayaa lagu samaynayaa biilkaaga labaad.



Daraasadda kayska: Kireystaha iska guura asagoon u sheegin shirkadda korantada iyo gaaska

Ubox waxay ka guurtey gurigeeda u kireysnaa bishii Agoosto, hase ahaatee uma aysan sheegin shirkaddii gaaska iyo korantada. Bishii November waxay heshay biilka tamarta oo ah \$485 oo ay ku isticmaashay gurigaas laga bilaabo Juun ilaa November.

Ubox waxay la soo xiriirtey shirkaddii ayadoo u sheegaysa inay ka guurtey gurigaas Agoosto isla markaasna milkiilihii guriga hore ayaa sidaas u caddeeyey shirkadda. Si kastaba ha ahaatee, kireysteyaasha cusub way diideen masuuliyadda biilkaas ayagoo sabab uga dhigaya lacagtii kiradooda inay toos u siiyeen milkiilaha, biilkaas ku jirey.

Ubox waxay u timid EWON si ay caawimaad uga hesho. Waxay u malaynaysey inaysan masuul ka ahayn qayb kasta oo biilkaas ah ka dib taariikhda ay guriga ka guurtey. Waxaan u sharaxnay Ubox in macaamiilku masuul ka yahay dhammaan lacagaha ilaa bixiyaha tamarta loo soo sheego in macaamiilku uusan ku noolayn cinwaankaas ama macaamiil kale uu ka furto akoon isla cinwaankaas.

Waxaan u soojeediney Ubox inay u keento wax dokumanti ah shirkadda tamarta si ay u caddayso taariikhda ka guuridda, taas oo ay samaysay. Shirkaddu waxay ku adkaysatay in Ubox ay masuul ka ahayd biilkaas, hase ahaatee waxay u sameeyeen bandhig (offer) si ay uga yareeyaan akoonkeeda ilaa \$219 ayagoo uga jeeda axsaanka macaamiilka, kaas oo ay ogolaatay.

Qiyaasuhu badanaa waxay dhacaan markii meter readers-ku aysan gaari karin mitirka sababato ah gaytka oo xiran, eey, masas, caarooyin ama xoomano. Si aad isaga ilaaliso helidda biilal la qiyaasay, waa inaad hubisaa inaad keento gaaritaan amaan ah ee mitirkaaga. Haddii aadan sidaas samayn, waxaa lagaa codsan karaa inaad ballan samayso si aqrir gaar ah lagu sameeyo ayadoo ujradda lacageed lagu saari doono.

Suuqdoonka tamarta

Shirkadaha tamarta waxay adeegsadaan dadka iibiyaal ah si ay u iibiyaan heshiisyada tamarta ayadoo la adeegsanayo taleefanka, xaruumaha shoobinnada iyo guri guri ayagoo taga. Haddii ay kuu yimaadaan suuq-geeyayaasha tamarta, waxba ha u saxiixin ilaa aad aqriso oo aad fahamto heshiiska.



Haddii aadan hubin soo-bandhidaas (offer), weydii cid kale oo aad ku kalsoon tahay inay kaa hubiso. Waxaad kaloo la xiriiri kartaa EWON haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan keshiiskaas.

Caawimaadda bixinta biilasha

Haddii ay dhibaato kaa haysato bixinta biilasha, waxaa jira caawimaadyo la heli karo. Waa inaad hubisaa inaad la xiriirto shirkaddaada haddii aadan awoodin inaad lacagta ku bixiso waqtigeeda waana inaad hore u hesho caawimaad. Taasi waxay kaa joojin kartaa dayntaada oo sii kororta markaasna korontadii, gaaskii ama biyihii lagaa jaro. Waxaad kaloo ka codsan kartaa saaxiibkaa ama shaqaalaha bulshada inay kuula hadlaan shirkadda ayagoo ku matalaya. Noocyada kala duwan ee caawimaadaha ay heli karaan macaamiishu waxay ku liis-garaysan yihiin hoos.

Daraasadda kayska: Qiyaasidda sare waxay keentaa biil sarreeya

Samatar keligiis ayaa ku nool yunidka guryaha bulshada oo leh qalabka korantada oo yar. Waxuu helay biilka korantada oo la qiyaasay oo ah \$908. Samatar wuxuu ku hadlaa Ingiriisi kooban, sidaas darteed qareenkiisa Bahdoon, ayaa la xiriirey shirkaddii si uu uga doodo biilka sababtoo ah laba jibaar ayey ka badnayd biilkiisa caadiga ah iyo inuu maqnaa qayb ka mid ah muddada biilkaas. Shirkaddii kuma noqonayso qiyaasta, sidaas darteed Bahdoon wuxuu la xiriirey EWON si uu caawimaad uga helo. Bahdoon wuxuu noo sheegay in Samatar ka walaacsanaa lacagtaas badan oo lagu leeyahay. Waxaan u sharaxnay mashruuca Ka-caawinta Lacag-bixinta Akoonada Tamarta (EAPA) markaasna Bahdoon wuxuu sheegay inuu ballan samaynayo.

Baaristii EWON waxay muujisay in shirkaddu ay qiyaastay biilka Samatar sababtoo ah mitirka ayaa ku jirey gudaha yunidka isla markaasna ninka meter reader-ka ah ma uusan gaari karin mitirka si uu u aqriyo. Qiyaastu waxay ku salaysnayd isticmaalkiisa isla muddadaas sannadkii hore, hase ahaatee sababtoo ah muddo ayuu ka maqnaa waqtigaas sannadkan, waxayna ahayd qiyaasid sarreysa.

Shirkaddu waxay heshay macluumaadkii isticmaalka ee dhabta ahaa waxay mar labaad biil u dirtay Samatar ku salaysan isticmaalkiisii. Taas waxay yaraysey biilkiisii ilaa \$506. Isla markaasna, Samatar wuxuu helay foojarada EAPA. Yaraynta biilka waxaa sii raacay, caawimaadda EAPA oo la macno ah inuu awoodey inuu iska bixiyo lacagta akoonkiisa.

Qorsheyaasha Lacag-bixinta

Qorshaha lacag-bixinta waa heshiis ku saabsan inta aad bixin karto iyo sidaad u bixinayso. Waxay kuu ogolaanaysaa inaad biilka ama daynta ku bixiso ilaa waqti. Sharci ahaan, shirkadaha tamartu waa inay macaamiisha siiyaan bandhig (offer) qorshaha lacag-bixineed markii ay jiraan dhibaato dhaqaale. Shirkadaha biyaha qaarkood waxay kaloo bixiyaan qorshe lacag-bixineed. La xiriir EWON haddaad caawimaad uga baahan tahay kala-xaajoodka qorshaha bixiyahaaga tamarta ama biyaha.

Kabidda (Rebates)

Dowladda NSW iyo tan Federaalka waxay bixiyaan dhowr kabid kuwaas oo ka caawiya macaamiisha xaqa-u-leh inay bixiyaan biilashooda tamarta. U-sheeg shirkadda haddii aad qaadata lacagta howlgabka dowladda maaddaama aad xaqa u leedahay kabidda. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan kabidda iyo sida loo codsado, weydii shirkadda tamartaada, weyddii Centrelink kana eeg www.energy.nsw.gov.au.

EAPA iyo PAS

Foojarada Ka-caawinta Lacag-bixinta Akoonada Tamarta (EAPA) waxay kaa caawin karaan bixinta biilasha korantada iyo gaaska. Bixiyeyaasha biyaha qaarkood waxay kaloo ogolaadaan foojarada Qorshah Ka-caawinta Lacag-bixinada (PAS) si looga caawiyo bixinta biilasha biyaha.

Waxaad u tegi kartaa haya'daha dayeelka bulshada sida St Vincent de Paul ama migrant centres si aad u codsato foojarada EAPA ama PAS. Wac EWON haddii aadan hubin haya'ddii bixisa foojarada. Haya'daha bulshada waxay kuu samayn doonaan ballan si loo eego inaad xaqa u leedahay. Keliya milkiilaha akoonka ku qoran ayaa soo codsan kara foojarada waxayna u baahan yihiin inay keenaan biilka si ay u muujiyaan inta lagu leeyahay.

Barnaamijyada Dhibaataada

Shirkadaha tamartu waxaa looga baahan yahay inay siiyaan macaamiisha xaqa-u-leh taageero ayagoo u maraya barnaamijyadooda dhibaatooyinka. Barnaamijyadaasi waxay ka caawiyaan macaamiisha ku jirta dhibaatooyinka dhaqaale inay tamartu u sii xirnaato ayna ka kabaan biilashooda. Shirkadaha biyaha qaarkood waxay kaloo leeyihiin barnaamijyada dhibaatooyinka. La xiriir shirkaddaada si loo eego inaad xaqa-u-leedahay.

Haddii ay dhibaato kaa haysato bixinta biilasha, la xiriir bixiyahaaga sida ugu dhaqsaha badan si aad caawimaad u hesho helidda agabkana lagaaga jarin.

Kala-talinta dhaqaalaha

Kala-talinta dhaqaalaha waa adeeg lacag la'aan ah oo ay bixiyaan haya'do badan ee bulshada. Kala-taliyaha dhaqaalaha wuxuu kaa caawin karaa inaad sheegto intaad awoodo inaad ka bixiso akoonkaaga. Macluumaadkan wuxuu kugu caawin karaa inaad shirkaddaada kala xaajooto qorshe lacag-bixineed la awoodi karo. Si aad u hesho la-taliye, ka wac Financial Counsellors' Association of NSW taleefanka 1300 914 408 ama ka eeg www.fcan.com.au.





Biilasha aan la-bixin iyo Ururinta daymaha

Haddii aad haysato biilal aan la-bixin iyo dayn waxaa kula soo xiriiraya ururiye (loo yaqaan "mercantile agent"), waxaad ka wacdaa Credit & Debt Hotline taleefanka 1800 808 488 oo ah la-talin lacag la'aan ah ama la xiriir EWON.

Ka-Jaridda

Waxa la sameeyo haddii lagaa jaro

Haddii lagaa jaro korantada, gaaska ama biyaha, la xiriir bixiyahaaga si aad u samayso in dib laguugu xiro. Mararka qaarkood ka-jariddu waxay u dhacdaa qalad, hase ahaatee haddii ay dhacday sababtoo ah waxaad qabtaa biilal aan la-bixin waxaad u baahan kartaa inaad heshiis la samayso bixiyaha oo ku saabsan lacag-bixinta ka hor intaysan dib kuugu xirin korantaddii, gaaskii iyo biyahii. Waxaad kaloo bixin doontaa ujradda-lacageedka dib-u-xiridda. Haddii ay dhibaato kaa hayso inaad heshiis la samaysato, kala xiriir EWON wixii caawimaad ah.

Waxa la sameeyo haddii aad la kulanto ka-jarid

Haddii aad la kulanto ka-jarid, la xiriir shirkadda sida ugu dhaqsaha badan si aad ugala hadasho xaaladdaada. Haddii ka-jaridda laguugu goodiyeey sababtoo ah waxaad haysataa biilal aan la-bixin, isla markiiba hel caawimaad si aad uga baaqsato in korantaddii, gaaskii iyo biyahii lagaa jaro iyo inaad ka baaqsato qarashka dheeraadka ah ee ujradda dib-u-xiridda. Lagaama jari karo haddii aad ballan la leedahay la-taliyaha dhaqaale ama haya'd bulshadeed wax ku saabsan foorarada EAPA, sidaas darteed u sheeg shirkaddaada inay la socoto haddii aad haysato ballan la buugareeyey.



Daraasadda kayska: Howlgabe ayey haysataa ka-jaridda korantada iyo gaaska.

Markii sarkaalka goobta uu yimaado si uu u jaro agabka korantadeeda sababtoo ah lacag-bixin la'aan, Hodan waxay u sharaxday inay ku shaqayso nebuliser si ay u maarayso cudurka sanbabkeeda markaasna sarkaalkii wuu iska tegey asagoon dhammaystirin ka-jariddii. Akoonkeeda shidaalka ee laba akoonlaha ah wuu dhacsanaa waxayna doonaysaa inay ka baaqsato in korantadeedii, gaaskeedii in laga jaro, sidaas darteed waxay la xiriirtey EWON si ay caawimaad u hesho.

Hodan waxay qaadataa lacagta howlgabka iinta isla markaasna ninkeedu hadda ayuu shaqo helay mar labaad. Waxay sharaxday inaysan bixin Karin \$600 oo dhan ee lagu leeyahay akoonkeeda, hase ahaatee ay hadda bixin doonto lacag bixin dhan \$200 ka dibna ay maarayn doonaan inay bixiso \$100 labadii-asbuuca si ay u wada bixiso lacagaha ururay.

Markii aan la hadalnay shirkaddii tamarta, waxay noo sheegeen inuu jiro \$1200 looga leeyahay akoonka korantada iyo \$305 looga leeyahay akoonka gaaska. Waxay ogolaadeen inay akoonada joojiyaan waxayna aqbaleen qorshaha lacag-bixinta oo ay Hodan u aragatay mid la maarayn karo. Waxay caddeeyeen in Hodan ay horeba u haysatay Kabidda Guriga Daqliga Hooseeya waxayna ogolaadeen inay u soo diraan foomka codsiga kabidda tamarta caafimaadka, kaas oo duruufaheeda muujiyeen inay xaq-u-leedahay inay hesho.

Waxaan Hodan kula talinay inay ka codsan karto haya'daha bulshada foorarada EAPA si ay uga caawiyaan yaraynta lacagaha ku ururay waxaana siinay meel-u-diridda ku socota wakiilka EAPA ee degaankeeda. Hodan waxay sheegtay inay foomka kabidda caafimaadka u gayn doonto dhaqtarkeeda si uu soo dhammaystiro.

Haddii aad qabto wax dhibaato ah

- 1 Marka hore la xiriir shirkadda korantadaada, gaaskaaga ama biyahaaga una sharax dhibaataada.
- 2 Haaddii aysan shaqaalaha xarunta wicitaanka aysan ku caawin, waxaad ka codsataa inaad la hadasho maareeyaha.
- 3 Haddii aan dhibaataadii la xallin, waxaad ka wacdaa EWON taleefanka lacag la'aanta ah ee 1800 246 545.

La xiriir EWON



Wicitaan lacag la'aan ah 1800 246 545

Haddii aad ka soo wacayso taleefan mobayl ah, noo sheeg anagaa ku soo wacaynee.



www.ewon.com.au



Email—ka omb@ewon.com.au



www.facebook.com/ewonsw



www.twitter.com/ewonsw